



**Dr. Kriner Cash**  
**Superintendent**

Buffalo Board of Education  
**FOOD SERVICE DEPARTMENT**  
*Bridget O'Brien Wood, Director*  
1055 East Delavan Avenue  
Buffalo, New York 14215  
(716) 816-3688 ❖ Fax (716) 897-8041

**To:** Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta  
**From:** Bridget O'Brien Wood  
**Date:** Agoosto 6, 2019  
**Subject:** Xasaasiyadda Xagga Cuntada

Xasaasiyadda cunnadu waa arrin aad khatar ugu ah carruurta iyo qoysaskooda. Barnaamijka Nafaqada ee Carruurta USDA wuxuu aqoonsan yahay muhiimadda ay leedahay raacitaanka tilmaamaha caafimaadka ee xasaasiyadda cuntada.

Wax ka beddelka cuntada waxaa loo fulinayaa iyada oo lagu saleynayo qiimeynta xagga caafimaadka iyo qorsheynta daaweynta waana in ammarka wax ka beddelka uu ka yimaada maamul caafimaad oo la aqoonsan yahay. Dugsiyadu wax kama beddeli karaan ama ma beddeli karaan cunnooyinka ardayga iyagoon ka haysan caddeyn sax ah ee uu bixiyey daryeele caafimaad/dhakhtar.

Qoraal-dhakhtar caafimaad oo sanadle ah ayaa looga baahan yahay cunug kasta oo sharaxaysa xasaasiyaddiisa iyo talooyinka cuntadiisa. Saxeex khabiir caafimaad oo la aqoonsan yahay ayaa looga baahan yahay dukumentigan qoraalka. (Dokumentigan waxaa loo baahan yahay sanad kasta.)

U GUDBI DUKUMENTIGAAN CAAFIMAADKA Maamulaha Dugsiga ilmahaaga, kalkaalisada caafimaadka, ama shaqaalaha adeegga cuntada usbuuca ugu horreeya ee dugsiga, ama sannadka oo idil markay isbeddelo dhacaan. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan kala xiriir Adeegyada Nafaqada ee Ilmaha 816-3688. Waxaanu rabnaa inaan kula shaqeyno si aan u hubinno in ilmahaagu nabad qabo oona leeyahay qorshe waqti cunno oo qof walba ku faraxsanaan doono.

Cc: School Administrator  
Nurse  
Food Service Staff